

**GUDDIGA BULSHADA DUGSIGA**  
**QODOBADA SHIRKA LOOGA HADLAY**

**Sateembar 25, 2017**

**5:30-6:30 pm**

**Maktabka Riley**

Imaashada: Marcela Castillo, Sonia Gonzalez, Christi Paulson, Edward Khattar, Suzan Boserso, Chris Mitchener, Evangelina V., Jose R. Garcia, Nadia Rockwood, Julia Waldroup, Heather Bennett, Sara Farah, Jim Martin, Ronald Urbin.

Shirka wuxuu bilowday 5:30 pm.

Qof kasta waa la soo dhaweyay.

Wakiilada ka socdo gaadiidka waa imaan waayeen shirka kaddibna waxay soo direen fariin in ay ka xun yahiiin. Waxay iskudayi doonaan in ay tagaan shirka xiga.

Waxaa jiray wada hadal badan oo ku saabsan aruurinta qaaraanka sida haddii loo baahan yahay in la qabto habeenka fanka Diseembar. Waxaa go'aan lagu gaaray in Diseembar aad u dhawdahay iyo in laga yaabo in habeenka fanka la qabto Janaayo. Waxaa jiray fikrado kale oo la wadaagay sida xaaqidda meelaha dadka ku socdaan waqtiga qaboobaha. Ururkeno Lego, taasoo ka kooban kooxaha darajooyinka 4<sup>aad</sup> iyo 5<sup>aad</sup> ee barta fikradaha injineeriyada, horay u aruuriyaan lacag iyaga oo adeegsada sanduuqyada qaaraanka (sidaas darteed fadlan sii wad in aad u soo dirtid dugsigu). Ms. Waldroup waxay soo jeedisay Snacking In the USA taasoo lagu sameyay Riley dhowr sanno ka hor. Waxaa kaloo jiray xoogaa wada hadal ku saabsan waxa aruuriyaha qaaraanka looga baahan yahay in uu lacagta u aruuriyo. Macalimiinta waxay ka hadleen safarada dibadda. Hal waalid ayaa wuxuu sheegay in uu rabo in uu arko in abaal marrin badan la siiyo dabeecadda wanaagsan. Dadka waa in ay fikradahooda keenaan shirka soo socdo kaddibna waxaan samayn doonaa qorshooyinka ugu dambeeyo markaas.

Waa socotaa diyaarinta PTO. Ms. Mendoza waxaa laga fasaxay shirka hase ahaatee waxaa la weydiiyay in qoysaska raadiyaan macluumaadka ku saabsan doorashooyinka PTO ee goor dhaw soo bixi doono.

Agaasimaha Martin wuxuu nala wadaagay aragtida cusub ee Riley taasoo uu soo saaray dugsigu kuleylahii la soo dhaafay. Waa "Aqoonyaanada Riley: Rajeeya, Abuura, iyo Gaara Idinka oo Wadajira," Waxaa jiray wada hadal ku saabsan sida anaga, dugsi ahaan, aan ula shaqeyn karno qoysaska si ay u gaaraan aragtidaan. SCC waxay dareentay in dugsigu fulliyo shaqo wanaagsan in iyaga la ogeysiyo munaasabadaha dugsigu iyo waxa ka dhaca. Xubnaha waxay dareemeen in imaashada ardayda ka qalin jebisay East ama Highland ee tagay Riley in ay maraan dugsigu bisha Maajo ama Juun. Xubnaha SCC waxay kaloo ku adkeysteen muhiimadda ay leedahay in ardayda loo sheego in ay hagaag

tahay in la sameeyo qaladaad iyo in dhab ahaan qaladaadka nagu kaalmeyaan in aan wax ka barano. Waxay soo jeediyeen in aan barano hal eray ama weedh halkii todobaad taasoo ku kaalmeysa ardayda in ay fahmaan in guusha qaadato waqti iyo adkeysii. Waxaa la soo jeediyay in la soo bandhigo shaqada uu qabto ardayga si ardayda ugu faanaan waxay ay soo saareen. SCC waxay ku fakartay in ay tahay fikrad fiican in ardayda handasaan sawir la socda aragtida cusub kaasoo dib loogu daabici karo shaararka-t iyo bostarada. Xubnaha SCC waxay la tahay in la gaari karo himilada marka ardayda dareemaan farxad iyo guul iyo ogaadaan in la xanaaneeyo (iyo SCC dareento in tani iminka socoto). SCC waxay rabtaa in ay aragto bostaro waaweyn oo lagu suro dugsiga oo idil, loona sameeyo fursad lagu baddalo sawirada.

Agaasimaha Martin wuxuu miisaaniyadda la qeybsaday SCC. Inta badan, waxaan lacagtena doolarka ku bixinaa shaqaalaha taasoo noo ogolaata fasalo yaryar iyo shaqaaleynta tiro badan oo ah kaaliyeyaasha aqoonyaanka iyo taakuleynta kaaliyeyaasha aan tababarka ku lugta lahayn,

Waxaa jiray su'aal ku saabsan aruuriyaha qaaraanka samo falka soona ogolaatay SCC bishii la soo dhaafay. Rajada waxay ahayd in la aruuriyo lacag iyo saad la siiyo dagmada u baahan Texas, meelaha uu saameyay Duufaanka Harvey. Agaasimaha Martin wuxuu hubin doonaa xaaladda ay tani ku sugan tahay.

Shirka waxaa la soo gabogabeyay 6:30 pm. Shirka xiga waxaa la qaban doonaa Isniinta, Nofeembar 27, marka ay tahay 5:30 pm. Qoraalka waxa shirka looga hadlay waxaa soo diyaariyay Jim Martin.